OREGON DEPARTMENT OF Human Services
Developmental Disabilities Services

# 1915 (c) Isbeddelada ka-dhaafitaanka: Macluumaadka kooban ee faallooyinka dadweynaha iyo jawaabaha uu ka bixiyay Xafiiska Adeegyada Naafanimada Korriinka (ODDS, Office of Developmental Disabilities Services')

**La daabacay: Maarso 2026**

ODDS waxay soo ururisay faallooyinka dadweynaha laga bilaabo Janaayo 28–Febraayo 27, 2026, oo ku saabsan isbeddellada lagu sameeyay ka-dhaafitaanadan:

- Dadka Waweyn
- Carruurta
- Daryeelka Dadka Caafimaad ahaan Nugul
- Carruurta Caafimaad Ahaan Ku Lugta leh
- Daryeelka Habdhaqanka
- Baahiyaha Qayrucaadiga ah ee Carruurta.

Wuu ku mahadsan yahay qof kasta oo bixiyay jawaab-celin ku saabsan ka-dhaafitaanka qabyada ah. Faallooyinka ayaynu ku soo koobnay halka hoose. Waan kuu sharaxi doonaa haddii aan jawaab-celintaada isticmaalnay. Macluumaadkan waxaa lagu dari doonaa ka-dhaafitaanada kama dambaysta ah sida xeerarka federaalka ay farayaan.

| Macluumaadka kooban ee faallooyinka la helay |
|---|
| **Faallo ka timid:** Bixiyaha maareynta kiiska |
| **Macluumaadka kooban ee faallooyinka:** Waxaa la taageeray in laga saaro saxiixyada ku qoran foomamka Ogeysiiska Xuquuqda iyo Xorriyadda Doorashada. Waxaa taageero loo siiyay in dad badan ay u qalmi karaan adeegyada Medicaid. |
| **Jawaab-celinta ODDS:** Waad ku mahadsan tahay taageerada aad siisay isbeddelladan. |

| Macluumaadka kooban ee faallooyinka la helay |
|---|
| **Faallo ka timid:** Bixiyaha maareynta kiiska |
| **Macluumaadka kooban ee faallooyinka:** Waxaa dowladda laga codsaday inay caddeyso sharciyada iyadoo hubineysa in taageerooyinka dabiiciga ah marka hore la isticmaalo ka hor taageerooyinka lacagta laga bixiyo. |
| **Jawaab-celinta ODDS:** Waad ku mahadsantahay jawaab-celintan. Waqti xaadirkan ma samayneyno wax isbeddelo ah oo ku saleysan jawaab-celintan. |

| Macluumaadka kooban ee faallooyinka la helay |
|---|
| **Faallo ka timid:** Bixiyaha maareynta kiiska |
| **Macluumaadka kooban ee faallooyinka:**<br>Waxaa dowladda laga codsaday inay eegto inta ay ku bixiso Tababarka Shaqada iyo Nolosha Taageerada leh. Qiimaha Tababarka Shaqada ma ku dhiirigeliyo bixiyeyaasha inay hoos u dhigaan taageerada waqti ka dib. Qiimaha kuma dhiirigelinayo inay iswaafajiyaan lacagta la siiyo saacadaha dhabta ah ee adeegga ay bixiyaan. Qiimaha Nolosha Taageerada leh sidoo kale kuma dhiirrigelinayo inay bixiyaan heerka taageerada dadku dhab ahaantii u baahan yihiin. |
| **Jawaab-celinta ODDS:**<br>Waad ku mahadsantahay jawaab-celintan. Waxaan ka shaqeyneynaa siyaasadaha iyo qiimaha Tababarka Shaqada iyo Nolosha Taageerada leh. Waqti xaadirkan ma samayneyno wax isbeddelo ah oo ku saleysan jawaab-celintan. |

| Macluumaadka kooban ee faallooyinka la helay |
|---|
| **Faallo ka timid:** Bixiyaha maareynta kiiska |
| **Macluumaadka kooban ee faallooyinka:**<br>Waxaa dowladda laga codsaday inay dib-u-eegis ku samayso waxa “u baahan daryeel qof sharci ahaan mas'uul ah” ay kaga dhigan tahay ka-dhaafitaanka Baahiyaha Qayru-caadiga ah ee Carruurta. |
| **Jawaab-celinta ODDS:**<br>Waad ku mahadsantahay jawaab-celintan. Sharciga Aqalka Senate-ka ee 91 (2023) wuxuu leeyahay “qayru-caadiga” waxay la macno tahay ilmo qaba baahiyo caafimaad oo aad u sarreeya ama habdhaqan aad u sarreeya, iyadoo lagu saleynayo Qiimaynta Baahiyaha Oregon. Ka-dhaafitaanka ayaa sheegaya in shakhsiyaadka sharci ahaan |

mas'uulka ah la siin karo oo keliya marka ay bixinayaan daryeelka qayru-caadiga ah. Waqti xaadirkan ma samayneyno wax isbeddelo ah oo ku saleysan jawaab-celintan.

**Macluumaadka kooban ee faallooyinka la helay**

**Faallo ka timid:** Bixiyaha maareynta kiiska

**Macluumaadka kooban ee faallooyinka:**

Wuxuu ka walaacsan yahay isticmaalka wakiillada loo qoondeeyay. Waxay u muuqataa inay qof aan mas'uul sharci ahayn siiso mas'uuliyado la mid ah mas'uuliyadda mas'uulka. Tani waxay ka hor imaanaysaa sharciga Oregon. Wuxuu walaac ka taagan yahay tan inay u ogolaato mas'uuliyiinta sharciga ah inay helaan lacag ay ku daryeelaan qofka ay mas'uulka ka yihiin. Tan looma oggola sida ku cad xeerarka Medicaid. Wuxuu walaac ka taagan yahay in mas'uuliyiinta, waalidiinta, iyo xubnaha qoyska ee lacagta bixiya ay sababi karto in dad badan ay iska diiwaangaliyaan adeegyada. Halkii ay marka hore ku tiirsanaan lahaayeen taageerooyinka dabiiciga ah sida asxaabta, qoyska, iyo bulshada.

**Jawaab-celinta ODDS:**

Waad ku mahadsantahay jawaab-celintan. Inta lagu jiro qorsheynta adeegga xeerarka Oregon waxay u oggolaanayaan wakiilka la cayimay, oo uu ku jiro mas'uulka sharciga ah ee aan ahayn bixiyaha lacagta la siiyo, inuu go'aanno la gaaro qofka. Wakiilka loo cayimay wuxuu leeyahay awood aad uga hoosaysa tan mas'uulka sharciga ah. Waqti xaadirkan ma samayneyno wax isbeddelo ah oo ku saleysan jawaab-celintan.

| Macluumaadka kooban ee faallooyinka la helay |
| --- |
| **Faallo ka timid:** Bixiyaha maareynta kiiska |
| **Macluumaadka kooban ee faallooyinka:**<br>Waxaa dowladda laga codsaday inay ururiso macluumaad ku saabsan isticmaalka dhammaan xayiraadaha. Ma ahan oo kaliya kuwa sababa dhaawaca jirka. Tani waxay dowladda ka caawin doontaa inay fahamto inta jeer ee xayiraadaha la isticmaalo. Waxaa dowladda laga codsaday inay kormeer wanaagsan ku sameyso si loo yareeyo isticmaalka xayiraadaha. |
| **Jawaab-celinta ODDS:**<br>Waad ku mahadsantahay jawaab-celintan. Dhammaan ka-dhaafitaannada 1915(c) waxay ururiyaan macluumaadka gobolka oo dhan ee ku saabsan marka ay jiraan xayiraado khaldan iyo xannibaada aan ikhtiyaariga ahayn. Waqti xaadirkan ma samayneyno wax isbeddelo ah oo ku saleysan jawaab-celintan. |

| Macluumaadka kooban ee faallooyinka la helay |
| --- |
| **Faallo ka timid:** Bixiyaha maareynta kiiska |
| **Macluumaadka kooban ee faallooyinka:**<br>Waxaa dowladda laga codsaday inay si cad uga hadasho doorka Guddiga Xuquuqda Aadanaha. Waa in lagu daraa wax badan gaarsiinta adeegga iyo ilaalinta xuquuqda dadka ku nool Oregon. |
| **Jawaab-celinta ODDS:**<br>Waad ku mahadsantahay jawaab-celintan. ODDS waxay u heelan tahay inay hubiso oo ay ilaaliso xuquuqda qofka. Waqti xaadirkan ma samayneyno wax isbeddelo ah oo ku saleysan jawaab-celintan. |

| Macluumaadka kooban ee faallooyinka la helay |
|---|
| **Faallo ka timid:** Bixiyaha maareynta kiiska |
| **Macluumaadka kooban ee faallooyinka:**<br>Waxaa dowladda laga codsaday inay kormeer dheeraad ah ku sameeyo Wakaaladaha Qaab-dhismeedka Caadiga ah (SMA-yada). Dowladda waxay u baahan tahay inay hubiso inay dhaqaale ahaan mas'uul ka yihiin. Waxay bixiyaan daryeel tayo sare leh. Waxay haystaan shaqaale ku filan oo dabooli kara baahiyaha dadka. |
| **Jawaab-celinta ODDS:**<br>Waad ku mahadsantahay jawaab-celintan. ODDS waxay u heelan tahay samaynta kormeer xooggan iyo hubinta la xisaabtanka dhammaan bixiyeyaasha adeegga. Tani waxaa mid ah SMA-yada. Waqti xaadirkan ma samayneyno wax isbeddelo ah oo ku saleysan jawaab-celintan. |
| **Macluumaadka kooban ee faallooyinka la helay** |
| **Faallo ka timid:** Bixiyaha maareynta kiiska |
| **Macluumaadka kooban ee faallooyinka:**<br>Waxaa dowladda laga codsaday inay dib u eego Qaybta Xasilinta iyo Dhibaatooyinka (SACU). Waxay u baahan tahay inay raacdo sharciga Guryaha iyo Deegaannada Ku-saleysan Bulshada (HCBS). Waxay u baahan tahay inay la jaanqaado Qiimaynta Baahiyaha Oregon (ONA). |
| **Jawaab-celinta ODDS:**<br>Waad ku mahadsantahay jawaab-celintan. Waxaa jira shaqo hadda la qabanayo oo la doonayo in la beddelo laguna hagaajiyo SACU. Shaqadani waxay yeelan kartaa |

| |
|---|
| cusbooneysiin mustaqbalka ah oo ku saabsan xeerarka, siyaasadaha ama hababka. Waqti xaadirkan ma samayneyno wax isbeddelo ah oo ku saleysan jawaab-celintan. |
| **Macluumaadka kooban ee faallooyinka la helay** |
| **Faallo ka timid:** Bixiyaha maareynta kiiska |
| **Macluumaadka kooban ee faallooyinka:**<br>Ha taageerin in adeegyada maaraynta kiisaska dilaaliinta lagu xaddido wakaaladaha gaarka loo leeyahay. Wakaaladaha gaarka loo leeyahay waxaa la doortay 25 sano ka hor. Ma jiro hab loogu daro bixiyeyaal cusub. Waxay aaminsan yihiin in tani ay xaddidayso doorashada dadka ee bixiyeyaasha. |
| **Jawaab-celinta ODDS:**<br>Waad ku mahadsantahay jawaab-celintan. Oregon waxay leedahay ka-dhaafitaanka 1915(b)(4) oo la ansixiyay kaas oo u oggolaanaya gobolka inuu doorto wakaaladaha bixiya maaraynta kiiska. Ma qorsheyneyno inaan beddelno bixiyeyaasha maaraynta kiiska. Waqti xaadirkan ma samayneyno wax isbeddelo ka-dhaafitaan ah oo ku saleysan jawaab-celintan, |
| **Macluumaadka kooban ee faallooyinka la helay** |
| **Faallo ka timid:** Bixiyaha maareynta kiiska |
| **Macluumaadka kooban ee faallooyinka:**<br>Guryaha martigelinta waa in la joojiyaa. Taageero la hormariyay waa in dadka loogu diyaariyaa meesha ay ku nool yihiin. |

**Jawaab-celinta ODDS:**

Waad ku mahadsantahay jawaab-celintan. Nooma qorsheysno inaan Hoyga Martigelinta (Host Homes) ka saarno liiska goobaha la ansixiyay. Waqti xaadirkan ma samayneyno wax isbeddelo ka-dhaafitaan ah oo ku saleysan jawaab-celintan,

**Macluumaadka kooban ee faallooyinka la helay**

**Faallo ka timid:** Bixiyaha maareynta kiiska

**Macluumaadka kooban ee faallooyinka:**

Oregon waa inaysan adeegyada u kala saarin qaybaha "deganaanshaha" iyo "guriga dhex dhaca". Tani waxay qof walba ka caawin doontaa inay si isku mid ah u helaan xeerka 300%.

**Jawaab-celinta ODDS:**

Waad ku mahadsantahay jawaab-celintan. Waqti xaadirkan ma samayneyno wax isbeddelo ka-dhaafitaan ah oo ku saleysan jawaab-celintan,

**Macluumaadka kooban ee faallooyinka la helay**

**Faallo ka timid:** Bixiyaha maareynta kiiska

**Macluumaadka kooban ee faallooyinka:**

Oregon waa inay ka fogaataa ka-dhaafitaannada u baahan heer daryeel oo hay'adeed. Gobolku waa inuu adeegsadaa nidaam ku salaysan fursadaha qorshaha gobolka ee "k" iyo "i". Tani waxay gacan ka geysan doontaa ka-hortagga liisaska sugitaanka waxayna meesha ka saari doontaa baahida loo qabo dib u eegista heerka daryeelka sanadlaha ah. Tani waa shaqo ku celcelis ah oo horey loo qabtay intii lagu jiray u-qalmitaanka.

**Jawaab-celinta ODDS:**

Waad ku mahadsantahay jawaab-celintan. Waqti xaadirkan ma samayneyno wax

| |
|---|
| isbeddelo ah oo ku saleysan jawaab-celintan. |

Dukumeentigan waxaad ku heli kartaa luuqado kale, far waaweyn, farta indhoolaha ama qaabka aad doorbidaysid. Kala Xiriir Xafiiska Adeegyada Naafanimada Korrinka iimaylka odds.questions@odhs.oregon.gov ama 503-945-5811 (wicitaan/fariin gaaban). Waxaan aqbalnaa dhammaan wicitaanada dadka maqalku ku adag yahay.